



## Ka dhaafida (Exemptions)

Barnaamijka Qiimaynta Qaranka –Akhris-qoraalka iyo xisaabta (NAPLAN) Waa barnaamij qiimaynta ardayd sannadkar 3aad, sannadka 5aad, sannadka 7aad iyo sannadka 9aad oo lagu imtixaanayo aqoonta iyo xirfadaha ardayda dhinaca AKhris =qoraalaka iyo Xisaabinta

Natijada imtixaanku waxay siinaysaa ardayda ,waalidka,macalinka iyo maamulaha horumarka uu ardaygu sameeyey taas oo loo isticmaali doono inay caawiso dhinaca waxbarida iyo waxbarashada.

Fadlan ka fiirso qoraalka macluumaadka waalidka loogu tala galay bogga internetkan [www.vcaa.vic.edu.au](http://www.vcaa.vic.edu.au) wixii macluumaad dheeraad ah ee ku saabsan ( NAPLAN).

Xaaladaha qaarkood ,waxa laga yabaa in ardayda laga dhaafo imtixaanka ( NAPLAN tests). Sababahan oo kaliya :

- **Ardayda maskaxda wax yari uga dhiman yihiin.**

Ardayda maskaxda wax uga dhiman yihiin sida kuwa aan lagu samayn Karin qiimayn xaaladooda darteed ayaa imtixaanka laga dhaafi karaa. Waxa ku jira ardayda aan qaadan Karin amarada guud ee qiimeynta . si kasta ha u dhacdee , ardayda imtixaanka loogama reebi karo haddii ay wabarashada ku liitaan ama ay jirto sababa la xiriira hab dhaqankooda Ardayda xaalado qaarkeed ay haysato waa in la qiimeeyaa . wixii macluumaad dheeraad ah ee la xiriira xaalad gaar ah ,fadlan kala hadal Dugsigaaga.

- **Ardayga luqada ingriisiga hal sanno wax ka yar baranayey.**

Ardayga Sannad wax ka yar joogay imtixaanka ka hor ee ka yimid wadan aan luqada Ingriisiga laga baran isagana waa laga dhaafayaa imtixaanka.

Ardayda waa laga dhaafi karaa hal imtixaan ama wax ka badan.

Ardayda la siiyey ka-dhaafidda imtixaanka NAPLAN waxa looga war bixinayaa inay ka hooseeyaan heerka ugu hooseeya ee qaraneed ujeedooyin warbixineed awgood.

Ardayda aan ka qeyb galin ( NAPLAN tests) sababo awgeed ee aan ku jirin kuwa aan kor ku soo sheegnay looma diiwaan gelinayo in imtixaanka laga dhaafayo.

Foomka imtixaan ka dhaafista waa in la buuxiyaa ,uuna saxiixa Maamulaha iyo waalidku.

Ardayda laga **dhaafay** imtixaanka ee maqnaa maalinta waxa loo qaadanayaa tusaale ahaan laakiin looma qaadanyo arday **ka maqnaa** imtixaanka.